

CADDEYN TA CASHUUR LA'AANTA

Xilima ayaa loo bahanyahay caddeynta cashuurta

Qodobka 9^{aad} ee Xeerka Dakhliga ee Somaliland (Xeer Lr 72/2016) waxaa uu waajibinayaa in ganacsi kasta haysto Warqada Caddeynta Cashuur La'aanta; marka uu rabo in uu sameeyo qodabada hoose ku xusan:

1. Marka uu cashuurbixiye aan haysan daganaanshiyo u ka baxayo dalka
2. Marka la wareejinayo waraaqa Nootaayada ee lahaanshaha hantida
3. Helitaanka liisan cusub ama cusboonaysiinta liisamada ganacsi
4. Xaraynta baahinta qandaraas dawladeed ama aan dawli ahayn

Waaxda ama xafiisyada cashuuraha bariga ee Wasaarada Maaliyadda waxay bixinayaan Warqada Caddeynta Cashuur La'aanta. Hay'adaha Dawlada iyo Hay'adaha aan Dawliga ahayn ma qaadanayaan Warqada Caddeynta Cashuur La'aanta

Shuuruudaha Warqada Caddeynta Cashuur La'aanta

Ka hor inta aanad helin Caddeynta Warqada Cashuur La'aanta, waxa loo baahan yahay;

- Diwaangelinta cashuurbixiyaha iyo Tirsiga Aqoonsiga Cashuurbixiyaha
- In uu bixiyey dhamaan cashuuraha ku waajibay, sidoo kale aanay jirin cashuuro ku baaqday.

Tusaha dhamystirka foomka codsiga ee Caddeynta Cashuur La'aanta

Cashuurbixiyaha waxa looga baahan yahay inuu buuxiyo foomka qaybta midabka "Hurdiga" ee u horaysa oo kaliya.

QAYBA A: XOGTA CASHUURBIXIYAHA OO FAAHFAAHSAN

A1-Magaca cashuurbixiyaha; qor magaca lamida kii aad isku diiwangalisay ganacsigaaga

A2- Nooca Ganacsi: qor magaca garanaci ee aad hore isku diiwangalisay ganacsigaaga

A3-Nidaamka Cashuurta ; fadlan sheeg nidaamka cashuureedkaga, sida inaad tahay cashuurbixiye wayn, cashuurbixiye dhexe ama cashuurbixiye yaryar. Haddii aanad garanayn waydii Xafiiska Diiwangalinta Cashuurbixiyaha.

A4-TIN cashuurbixiyaha: qor Lambarka Aqoonsiga Cashuurbixiyaha ee lagu diiwangaliyey; hadii aanad diiwaangashanayn is diwangali, oo hel warqada diiwan galinta lana xidhiidh Xafiiska Diiwangalinta Cashuur-bixiyaha.

A5-Gobolka: Ku qor gobolka aad ku diiwangashantahay, sida Maroodi-Jeh, Awdal, Togdheer, Sanaag & Sool.

A6-Degmada:ku qor degmada aad ka diiwangashantahay ee gobolka uu ku yaal ganacsigaagu

A7- Sababaha aad u codsanayso Caddeynta Cashuur La'aanta: sax sanduuqa ku hor yaal adoo tilmaamaya sababta aad u codsanayso Warqada Caddeynta Cashuur La'aanta, kadibna gali taariikhda aad bilowday ganacsigaaga.

A8-Signature and date: Saxeex oo qof wakhtiga codsiga aad buuxisay

Qaybta B-E: Shaqaalaha Xafiisyada Cashuuraha Berriga ayey khusaysa oo buuxin doona qaybahaas.

XCB Xafiisyada Cashuuraha Beriga shaqalhooda ayaa dhamaystiraya oo hubinaya oo baadhaya in lagu siiyo Warqada Caddeynta Cashuur La'aanta